

Ku soo-dhowoow

Maktabadda magaalada Lysekil



Warbixin af-soomaali ku qoran

2015

Ku soo-dhowoow Maktabadda magaalada Lysekil!

Saacadaha ay furan tahay:

Isniin – khamiis	10-18
Jimce	10-16
Sabti	10-14

Amaahsashada waa lacag la'aan!

Wax kasta, aan ahayn filimada, lacag la'aan ayaa lagu amaahan kara.

Kaarka amaahda

Haddii aad doonayso in wax aad maktabadda ka amaahato, waa inaad haysata kaarka amaahda, kaasoo lagu siin karo haddii aad haysatid kaarka aqoonsiga ee adiga ku gaarka ah.

Maktabadda maxaa laga amaahan karaa?

Waxaad ka amaahan karta buugag, wargeysyada, buugagga codka ku duuban, filimada, kombyuutarro iwm.

Buugag afkaaga hooyo ku qoran

Waxaa la heli karaa buugag tiro badan oo lagu soo qoray luqooyinka soo-galeetiga.

Ku qoran luqad hab fudud loo aqrisan karo

Qofka adigoo kale ah oo goor dhow barashada luqadda bilaabay, waxaad heli karta buugag ku qoran af-iswiidisha fudud, xitaa buugagga codadka ku salaysan iyo wargeyso warar ku qoran.

Baro af-iswiidish

Waxaa jiro qaamuus iyo buugagga naxwiga, kuwaasoo luqado tiro badan oo kala duwan ku qoran, xitaa koorsooyinka luqadda.

Carruurta loogu talagalay

Buugag af-iswiidish iyo afka hooyo ku qoran: buugag masawirro ku salaysan, buugag la aqrisan karo, sheekoxariir, sheeko-carruureed iwm. Waxaa kaloo la heli karaa cajaladaha CD ku duuban sheeko-xariir, musiik iyo xitaa filimmo.

www.lysekil.se

Warbixin dheeraad waxaad ka heli karta haddii aad booqato Shabakadda internetka Dowladda hoose oo aad kaddib jag-siiso Maktabadda. Isla goobtaas waxaad ka heleysa liis buugagga laga raadsado.

Wixii su'aallo ah kala xiriir hawlwadeneyaal Maktabadda!

Nidaamka wax ka amaahsashada Maktabadda Lysekil

Amaahsasho

Haddii aad doonayso in wax aad maktabadda ka amaahato, waa inaad haysata kaarka amaahda.

Kaarka amaahda waa lacag la'aan.

Haddii da'daada ay 15 sano ka wayn tahay waa inaad na tusta kaarka aqoonsiga.

Haddii da'daada ay 15 sano ka hooseyso, waa in adiga iyo waalidiintaada buuxisaan warqad.

Markaas kaddib waxaa lagu siin doonaa Kaarka amaahda kaddib ayaa Maktabadda wax ka amaahan karta.

Hawlwadeneyada Maktabadda oo keliya ayaa garanaayo magacaaga iyo wixii aad amaahatay.

Kaarka amaahda

Haddii Kaarka amaahda u ka lummo waa inaad durbadiiba Maktabadda wargelisa.

Taasoo noo suurtagelin doonto in isticmaakiisa aan ciribtirno, kaddib cid kale waxba kuma amaahan karto.

Haddii Kaarka amaahda u ka lummo waa inaad bixisa qiimaha mid cusub lagugu sameeyn doono.

Waa inaad Maktabadda wargelisa haddii magacaaga ama adreeskaaga aad wax ka beddesho.

Mudada amaahsashada

Mudada amaahsashada buugagga waa afar toddobaad.

Laakinse mararka qaarkood mudada amaahsashada sidaas u ma dheera.

Mar labaad ayaa isla buugga amaahan karta, waa haddii qof kale usan buugga balansanin.

Haddii dib u soo celinta aad la soo habsaanto, waxaad bixin doonta kharashka la soo daahida.

Sidaasoo kale, haddii buugagga ay waxyeelmaan ama ka lummaan waa inaad bixisa kharashkooda.

Ballansashada buugga

Buug saf ayaa u geli karta.

Waxaa loo yaqaanno ballansashada buugga.

Markii buugii aad ballansatay dib loo soo celiyo waxaa lagu xajinayaa muddo hal isbuuc ah.

Taasoo warqad, e:mail ama sms lagugu wargelin doono.

Lambarrada sirta ah

Waxaa lagu siin doonaa lambarro sir ah (pinkod) oo Kaarka amaahda u gaar ah.

Adigoo lambarka sirta iyo barta Internetka Maktabadda adeegsanaayo ayaa waxaad heli karta warbixin ku saabsan waxyaalihii aad amaahatay, ballansan karta buug.

Kombyuutarrada Maktabadda

Lacag la'aan ayaa kombyuutarrada Maktabadda ku isticmaali karta.

Laakinse waa inaad ballansata.

Markii kombyuutarrada Maktabadda aad ku isticmaalayso waa inaad tixgelisa nidaamyada u degsan.



Maktabadda magaalada Lysekil